

Farriintani waxaa iyada oo ah Ingiriisi, Af-Ruushka, Simplified Chinese, Soomaali, Isbaanish iyo Vietnamese la soo geliyay:

<https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Janaayo 28, 2021

Ku socota: Daneeyayaasha ODDS

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Bilaabida Ololaha Impact Oregon



Want a career that makes a difference?

Consider a job working with people with disabilities!

 **impact**
OREGON

[ImpactOregon.careers](https://www.impactoregon.org/careers)

Horraantii Janaayo, waxaan diray [farriin](#) ku dhawaaqaysay bilaabida website-kayaga cusub, [ImpactOregon.careers](https://www.impactoregon.org/careers). [Impact Oregon](#) waa website-ka shaqada halkaasi oo daryeel bixiyayaasha ODDS iyo hay'adaha maamulka kiisku ay soo galin karaan shaqooyinka jira, kuwaasi oo lacag la'aan ah. Daryeel bixiyayaasha iyo hay'adaha maamulka kiisku waxay u soo jawaabeen si xiiso leh. Waxaanu leenahay oo jira in ka badan 100 shaqo oo isla hadaba la soo geliyay/dhejiyay. Haddii aa

tahay daryeel bixiye ama hay'ada maamulka kiiska oo aadan wali codsan galitaanka website-ka, fadlan sidaasi samee.

Toddobaadkan, olole lagu gaarayo gobolka oo dhan ah oo looga dan leeyahay in lagula xiriiro shaqo raadiyayaasha Oregon oo dhan ayaa bilaabmay. Waxaa dhici karta in aad xayaysiisyo ka aragtaan warbaahinta bulshada, internet-ka iyo ku dhawaaqis cusub oo dhanka raadiyaha ah. Ujeedada laga leeyahay waa in la xaqiijiyo in dadka reer Oregon ee raadinaya kala doorashada xirfada shaqo ay ogyihiin in [Impact Oregon](https://www.impactoregon.org) uu yahay ilo ay caawimaad ka heli karaan shaqo raadistooda.

Waxaan sidoo kale sameynay qalabka xirmada nooca internet-ka oo loogu talagalay hawl-wadaagayaashada:

<https://sharedsystems.dhsoha.state.or.us/DHSForms/Served//de4004a.pdf>

Qalabka xirmada ah wuxuu leeyahay warqado xayaysiis ah, astaamo, iyo kaararka warbaahinta bulshada oo aad isticmaali kartaan si aad nooga caawisaan sii gudbinta hadalka ku saabsan Impact Oregon. Waxyaabaha dhan waxaa la helayaa iyaga oo ku qoran 11 luqaddood. Waxaan rajeynaynaa in aad ilahani si ballaaran u wadaagtaan oo naga caawisaan in hadalku dadka gaarto!

Waad ku mahadsan tihiin taageeradiina inaga oo sii wadna dadaalada lagu taageerayo awooda shaqaale.

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ayaa laga heli karaa

<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waa aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan ama waxaad wici kartaa 711.